## Siistemka La Socodsiinta Argagixisada Qaranka

# Wargeyska

www.dhs.gov/advisories

**TAARIIKHDA LA SOO SAARAY: Jimce, Janaayo 18, 2019**

## Soo Koobidda Colaadda Argagixisadu ku Hayso Waddanka Mareykanka

Laga bilaabo 2015, Waaxda Sugidda Amaanka Waddanka (Department of Homeland Security) (DHS) waxay adeegsatay wargeyskaan si ay u iftiimiso colaadda sii socoto ay argagixisada ku haayso waddanka Mareykanka. Mareykanka wuxuu argagixisada kula jira dagaalka jiilasha, kuwaasoo raadiya in ay weeraraan dadka Mareykanka, waddankena iyo sida aan u nool nahay. Dadweyne xogogaal ah, soo jeeda, iyo ka-qeybgala waa mid ka mid ah hantidena ugu waaweyn si loo aqoonsado argagixisada suurtogalka ah, loogana hortago weerarada.

## Muddada ay socoto

**Lasoo Saaray:** Janaayo 18,2019, 2:00 P.M. ET

**Dhacaysa**: Luuliyo 14, 2019, 1:00 P.M. ET

**XUSUUSIN:** Dhajinta mudada kordhintu waxay la daahday gabaabsiga ku dhacay maalgalintii fadaraalka.

## Tafaasiisha Dheeradka ah

- Waxaa na soo food saaray mid ka mid ah daruufaha ugu culus colaadda argagixisada laga soo bilaabo weerarkii 9/11, ururada argagixisada shisheeya waxay wadaan in ay ka fa'iideystaan Internetka si ay u dhiirigeliyaan, u siiyaan awood, ama faraan shakhsiyaadka horay u joogo halkaan waddanka in ay geystaan falalka argagixisada. Kuwa lagu tuhunsan yahay argagixisada ku barbaartay waddanka waxay in badan isku haleyaan farsamada, sida brograamyada warbaahinta bulshada ee qarsoon, dhinac ilaa dhinac, si aan loo ogaanin.
- Kooxaha argagixisada waxay ku dhiiri geliyaan kuwa ay qortaan in ay adeegsadaan waxyaabaha fudud ee lagu bartilmaameedsan karo goobaha iyo munaasabadaha dadweynaha. Qaar ka mid ah xiiladaha weerarka waxaa ka mid ah isticmaalka baabuurta lagu dhufto meelaha, ooy ka mid tahay baabuurta kirada loo isticmaalo, hubabka yaryar, middiyada la soofeyay ama middiyada, iyo waxyaabaha qarxo ee lagu sameeyo guriga, iyo sunta ama kiimikada.
- Qaar ka mid ah kooxaha argagixisada dibadda waxay adeegsadaan waayaha goobta dagaalka si ay u daba galaan farsamooyinka cusub iyo xiiladaha, sida siistemyada hawada aysan qofna wadin iyo maadooyinka kiimikada ee loo adeegsan karo meelo dibadda ka ah goobta iska horimaadka ka jiro. In badan oo teknooloojiyadaan ka mid ah ayaa lagu heli karaa si fudud. Intaas kaddib, argagixisada waxay sii wadaan in ay bartilmaameed ka dhigtaan dayaaradaha ganacsiga iyo dayaaradaha xamuulka qaada, iyaga oo adeegsada waxyaabaha qarxa ee la qarsado.
- Meediyaha xag jirka dagaalka waxay shakhsiyaadka dunida oo idil ku dhiiri gelisaa in ay qaadaan dagaal iyaga oo adeegsada dhamaan hababka suurtogalka ah. Guulasha sii socda ay gaaraan Mareykanka iyo kuwa iskaashiga la leh si ay u carqaladeyaan kana adkaadaan argagixisada goobta dagaalka waxay ku dhiiri gelin kartaa argagixisada waddanka ku barbaartay in ay falalka dagaalka ka fulliyaan gudaha waddanka baddalkii ay iskudayi lahayeen in ay safar ku tagaan dibadda si ay u dagaalamaan ama ku dhaqaaqaan aar gudasho la xariirta jabka ka muuqda.
- Intaasi waxaa dheeraad ku ah in dagaalyaanka argagixisada shisheeyaha, ee soo qaatay tababar iyo soo tijaabiyay argagixisada dagaalka, waxay u badan yahiin in ay ka cararaan goobaha argagixisada kantaroosho, rabitaankoodana yahay in ay weerar ka fulliyaan meelo kale, sida Mareykanka.

## Dadaalka Ka Hortagga Argagixisada ee Dawladda Mareykanka

- DHS iyo Xafiiska Baaritaanka Federaalka (FBI) waxay sii wadaan in ay hoggaamin siiyaan iskaashatada gobolka, deegaanka, qabaailka iyo deegaanka ee la xariira jawiga colaadda iminka jirta. DHS waxay sii wadaysaa taageerada ganacsiga gaarka loo leeyahay si ay qiimeyn ugu sameeyaan halisaha iyo isukuduwidda talaabooyinka sugidda ammaanka ay qaadaan milkiileyaasha ganacsiga iyo hawl wadeenada. Waxaa dhici karto in dadweynaha kor ka arkaan hawlaha hirgelinta sharciga iyo sugidda ammaanka, gudaha iyo agagaarka goobaha dadweynaha iyo munaasabadaha.
- DHS waxay si dhaw ula shaqeysaa FBI iyo kuwa ay la leedahay iskaashiga sirta iyo waxay carqaladeysaa kuwa lagu tuhmo argagixisada, kor u qaadidda baaritaanada iyo kala-shaandheynta lagu aqoonsado musaafiriinta la tuhunsan yahay iyo xamuulka, ka hortagta xag jirka dagaalka iyo qoritaanka argagixisada gudaha bulshadena, la socoto colaadda nala soo darista, iyo isdhaafsi la sameeyso iskaashiga dibadda.
- Marka la sii balaariyo, DHS waxay xil iska saartay in ay ka hortagto dagaalka iyo colaadda loola jeedo in lagu cabsi geliyo ama lagu jujuubo dadyowga qaar, taasoo ku saleysan diintooda, isirkooda, ama aqoonsigooda.
- DHS waxay kobcinaysaa barnaamijkeeda lagu sugahayo ammaanka bartilmaameeyada jilicsan iyo meelaha lagu badan yahay , ooy ku jiraan dugsiyadu.

## Noocyada Ogeysiisyada

### Wargeyska

Waxay sharaxdaa wayaabaha iminka socda ama sasaanka guud ee ku saabsan colaadda argagixisada.

### Digniinta Sare

Waxay ka digtaa colaadda argagixisada lagu kalsoonaan karo ee ka soo horjeedo Mareykanka.

### Digniinta Nala Soo Daristay

Waxay ka digtaa colaadda argagixisada nala soo daristay, cayiman, ee lagu kalsoonaan karo kana soo horjeedo Mareykanka.

## Sida aad Kaalmo uga Geysan Kartid

- Waxaad hawlaha la tuhmi karo usoo sheegtaa hirgalinta sharciga deegaanka oo ah kuwa ugu fiican ee ka bixiya tafaasiil cayiman oo ku saabsan tilmaamayaasha argagixisada.
- Hawlaha la tuhmo ama macluumaadka ku saabsan colaadda, sida waxyaabaha ka socdo internetka u soo sheegtaa Fusion Centers iyo Xafiisyada Goobaha FBI (FBI's Field Offices) - qeybna ka ah Qorshaha Soo Sheegidda Hawlaha La Tuhunsan Yahay Qaranka oo Idil (Nationwide Suspicious Activity Reporting Initiative).
- Baro sida loo aqoonsado calaamadaha qorsheynta hawlgalka ka horeyso ee la xariira argagixisada ama hawlaha dambiyada kale.

## Isu Diyaari

- Isu diyaari ammaanka iyo horay u qorsheyso. Ku talogal in aad la kullantid dib u dhac iyo xannibaadyo la xariira waxyaabaha laga helo meelaha dadka ku badan yahiin iyo munaasabadaha dadweynaha.

- Mas'uul ka noqo ammaankaada shakhsiga. Waa in aad ogsoon tahay meelaha laga helo bixidda degdegga iyo shaqaalaha ammaanka. Qaado macluumaadka degdegga ee lagaala xariiro iyo macluumaadka baahida khaaska.
- La xariir, Qorsheyso, Tababar, iyo U sheeg ganacsatada iyo shaqaalaha. Qalabka Sugidda Ammaanka/ilaha waxaa laga heli karaa Ololaha Sugidda Ammaanka Waddanka (Hometown Security Campaign).

## Xogogaal Noqo

- Dawladda Mareykanka waxay bixin doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan colaad kasta oo nala soo darista isla marka la helo macluumaad dheeraad ah. Dadweynaha waxaa lagu dhiiri geliynaa in ay dhageystaan hirgelinta sharciga deegaanka iyo saraakiisha ammaanka dadweynaha.
- Waxaan ku dhiirigelineynaa Mareykanka in ay sii wadaan safarka, tagaan munaasabadaha dadweynaha, iyo in ay si madax banaan ula xariiraan dadka kale balse adkeyaan feejignaanta lana socdaan agagaarkooda.
- Waaxda Arrimaha Dibadda (Department of State) waxay soo saartaa la socodsiinta iyo digniinta safarada caalamka.
- Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, booqo Diyaar.

**Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Waxa Aad Aragtay™**
**Waxaad hawlaha la tuhmi karo u sheegtaa hirgelinta sharciga deegaanka ama wac 911.**

Siistemka Ogeysiinta Argagixisada Qaranka (National Terrorism Advisory System) wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan arrimaha sugidda ammaanka waddanka iyo colaadda. Waxaa qeybiya Waaxda Sugidda Ammaanka Waddanka (Department of Homeland Security). Waxaad macluumaad badan ka heli doontaa: http://www.dhs.gov/advisories. Si wararkii ugu dambeyay laguugu soo diro telefoonka gacanta: www.twitter.com/dhsgov.

*Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Waxa Aad Aragtay™ la isticmaalay kaddib marka ruqsad laga soo qaatay Madaxda Gaadiidka Magaalada NY (NY Metropolitan Transportation Authority).*